# Tusmada Waalidka: Qiimaynta Kooban ee B ah ee Kentucky: Erayada Muhiimka ah ee ay tahay Inaad Ogaato iyo Su'aalaha iyo Jawaabaha

*Waxaa dib loo Eegay Oktoobar 2024*

Ujeedada *Tusmada Waalidka: Qiimaynta Soo Koobitaanka Badalka ah ee Kentucky (AKSA)* waa in la bixiyo erayada muhiimka ah iyo jawaabta su'aalaha waalidiintu ka qabi karaan Qiimeynta Khulaasada Gaarka ah ee Kentucky si ay go'aan faahfaahsan ugu qaataan ilmahooda.

## Erayada Muhiimka ah ee ay tahay inaad Ogaato

**Caawimaada:** Isbadel lagu sameeyay agabka ama habraacyada fududeynaaya helitaanka inta lagu jiro casharka iyo qiimeynta. Caawimaadaha ayaan badelayn dhismaha ama ujeedada waxa la baraayo ama la cabiraayo. Caawimaadaha qiimeynta ayaa loogu talo galay inay u sahlaan ardayga ka qaybgalka qiimeynta iyo inay abuuraan natiijo sax ah oo muujinaysa waxa ardaygu ogyahay iyo waxa uu samayn karo.

**Soo Xigashooyinka:** Isbadellada gaarka ah ee lagu sameeyay baahiyaha gaarka ah ee ardayga. Isbadalada lagu sameeyay agabka horey u jiray ama bixinta casharka si loo daboolo baahiyaha ardayga. Tusaaleyaasha waxaa kamid ah aaladaha wax tilmaamaha, calaamadaha qalinka sabuurada (Mayer Johnson), sawirada, sanballada ay la socdaan agabka runta ah, agabka runta ah, sawirada la balaarshay, sawirada la soo dhaweeyay ama kor loo qaaday, midabka iftiinka badan ama calaamado tilmaamo bixinaaya.

**Hab-dhaqanka la Qabsiga:** Habdhaqannada aasaasiga ah ee qofka si uu ugu noolaado qaab madax banaan uuna ugu dhaqmo si badqab leh nolol maalmeedkiisa.

**Gudiga Diiwaangalinta iyo Baahinta (Admissions and Release Committee, ARC):** Koox ka kooban shaqsiyaad oo gaarta go'aannada waxbarashada ee ilmaha u baahan waxbarashada gaarka ah. Waxaa kamid ah waalidka, ilmaha (sida haboon), macalinka waxbarashada guud, macalinka waxbarashada gaarka ah, wakiilka degmada (maamulaha, agaasimaha waxbarashada gaarka ah, la taliyaha hagista, iwm.), qiimeeyaasha iyo bixiyaasha adeegyada la xiriira.

**Heerarka Guusha Gaarka ah:** Heerka guusha gaarka ah ayaa abuuraaya yoolka waxqabadka oo ka duwan xajmi ahaan heerka guusha ee heerka fasalka. Si guud, heerarka guusha gaarka ah waa inay waafaqaan heerarka nuxurka tacliinta gobalka, ay hormariyaan helitaanka manhajka guud ay raadraacaan garashada xirfadeed ee heerarka guusha ee ugu sareeya ee suuragalka ah. [Ka eeg 34 C.F.R. §200.1(d)]

**Bartilmaameedka Qiimeynta Badalka ah:** Yoolku wuxuu matalaya xadidaadaha ku xiran Heerka Tacliinta Kentucky (KAS) ee la doortay. Bartilmaameedka Qiimeynta Badalka ah ayaa yareyn kara qaybaha heerka asagoo tusmo gaar ah ka bixinaaya waxa shayga qiimeyntu matalaayo. (Heerarka Tacliinta ee Kentucky - KSA ee Badalka ah 2023)

**Dibloomada Gaarka ah ee Dugsiga Sare:** Waxaa la siiyaa ardayda naafada ah ee aan awoodin inay buuxiyaan shuruudaha dibloomada dugsiga sare ee caadiga ah. Dadka qaaba dibloomada dugsiga sare ee gaarka ah ayaa ka qaybgeli doona imtaxaanaadka gaarka ah waxayna buuxin doonaan waxbarashada koorso gaar ah. Dibloomada dugsiga sare ee gaarka ah ayaan waafaqsanayn dibloomada dugsiga sare ee caadiga ah.

**Tignooloojiyada Kaalmaatiga ah:** Agabka iyo xeeladaha loo adeegsado si looga caawiyo ardayda abuurista iyo ka qaybgalka tacliinta macnaha leh, xiriirada bulshada iyo farsamooyinka shaqada; waxay u dhexeyn kartaa tignooloojiyad fudud (tusaale nidaamyada hadalka ee aan la kaabayn, luuqada indhoolka/dhagoolka, iwm) ilaa tignooloojiyada sare, sida kumbuyuutarada leh batoonnada xiriirka.

**Shaqooyinka Yool-gaarista:** Munaasabadaha waxqabadka ee ka doonaaya ardayda inay dhameeyaan shaqo, ayagoo ku shaqeynaaya talaababa mar, sida uu hagaayo macalinku.

**Xiriirka Xaqiijinta iyo Midka Badalka ah (Augmentative and Alternative Communication, AAC)**: Nidaamka tignooloojiyada hoosaysa, dhexdhexaadka ah ama sareysa oo ka caawiya ardayga ku hadalka luuqadda (tusaale, samaynta codsi, bilaabista iyo ka jawaabista su'aalaha, qeexida waxyaabaha ama dhacdooyinka iyo muujinta diidmo, aaladaha codka sareeya sida agabka kaaba u badelidda qoraalka hadal, sawir ama sabuuradaha sanbalka).

**Kartida Xiriir ahaaneed**: Adeegsiga nidaamka hadalka oo u sahlaaya ardayda inay helaan ayna muujiyaan aqoonta.

**Nuxurka Bartilmaameedka ah:** Heerarka nuxurka ee ah diirada qiimaynta. Qiimaynta Kooban ee Gaarka ah ee Kentucky (AKSA), yoolalka nuxurka ayaa lagu qeexaa Shaqooyinka Xoojinta ee heerka fasalka ee maadooyinka akhriska, xisaabta, sayniska, cilmiga bulshada iyo wax qorista.

**Xogta Hadda:** Waa xogta la uruuriyay mudadii ugu danbaysay intii lagu jiray 365 maalmood ee lasoo dhaafay. Tusaaleyaasha waxaa kamid ah xogta la socoshada hormarka IEO, warbixinnada hormarka ee IEP, imtaxaanaadka ku saleysan fasalka, kormeerada fasalka, sanballada shaqada, xogta qiimeynta hab-dhaqanka shaqada, imtaxaanaadka kala guurka ah, qiimeynada tignooloojiyada kaalmaatiga ah iyo diiwaannada xaadirista.

**Ardayga Barta Ingiriiska (English Learner, EL):** EL waa arday luuqadiisa hooyo ay tahay luuqad aan ahayn Ingiriis ama arday ka yimid deegaan luuqad aan ahayn Ingiriis ay samaayn wayn ku lahayd heerka aqoonta luuqadda Ingiriiska ee qofka. Caqabadaha ka haysta ardayga EL ku hadalka, akhriska, qoraalka ama fahanka luuqadda Ingiriiska ayaa caqabad ku noqon kara waxbarashada fasallada ku baxaaya Ingiriiska iyo guusha uu ka keeno imtaxaanaadka ku baxaaya afka Ingiriiska.

**Xeerka Guusha Arday Katsa (Every Student Succeeds Act, ESSA) :** Bishii Diseembar 2015, Koongareeska ayaa ansixiyay Sharciga Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare (ESEA), oo ah sharciga ugu wayn ee federaalka oo maamulaaya waxbarashada dugsiga barbaarinta ilaa fasalka 12-aad ee dugsiga dawlada. Asaga oo loo yaqaano Sharciga Guusha Arday Katsa (ESSA), xeerku wuxuu badel u ahaa sharciga No Child Left Behind (NCLB, Ilmo Kasta waa Qasab in uu Waxbarasho helo) wuxuuna abuuray xeerka mudada dheer oo siinaaya goballada fursadaha dheeraadka ah oo bixinaaya awooda maamulka dheeraadka ah ee heer gobal iyo heer deegaan ee habraaca isla xisaabtanka. (Waaxda Waxbarashada Maraykanka)

**Cadaynta:** Tan waxaa laga wadaa ilaha gaarka ah ee xogta loo adeegsanaayo aqoonsiga sifooyinka ardayga ee buuxinaaya ama aan buuxinayn shuruudaha ka qaybgalka.

**Caawimaadaha Xadka Dhaafsan:** Caawimaadaha, isbadellada iyo tignooloojiyada kaalmaatiga ee XAD AHAAN DHAAFSAN heerka lagu ogol yahay imtaxaanaadka guud ee ardayda, sida lagu qeexay Ka Qaybgelinta Ardayda Baahidda Gaarka ah Qaba Barnaamijka qiimaynta iyo Isla Xisaabtanka ee Gobalka Laga Doonaayo laguna cadeeyay qodobka 703 KAR 5:070.

**Casharka Gaarka ah ee Tooska ah ee Balaaran:** Cashar diiradda la saaraayo oo loo sameeyay toosna loo siiyo arday gaar ah. Casharka noocaan ah waxaa u baahan ardayda qaba naafooyinka waawayn ee garaadka si ay u helaan aqoonta iyo xirfadaha la higsanaayo. Ardayda qaba naafooyinka waawayn ee garaadka ayay u badan tahay inay u baahan yihiin casharkaan si wayn si ay ugu dabaqaan aqoonta iyo xirfadaha arimaha badan.

**Sharciga Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah (Individuals with Disabilities Education Act, IDEA):** Sharciga federaalka oo la dhaqan gashay 1990 kadibna dib loo ansixiyay 1997 iyo markale sanadkii 2004. Waxaa loo sameeyay inuu difaaco xuquuqda ardayda naafada ah asagoo xaqiijinaaya in qof kasta uu helo waxbarashada bilaashka ah ee dawlada ee haboon (FAPE), ayadoo aan loo eegayn awoodiisa. IDEA keliya kama shaqeeyo siinta helitaanka loo siman yahay ardayda naafada ah laakiin sidoo kale wuxuu siinayaa difaacyada dheeraadka ah ee adeegyada waxbarashada gaarka ah iyo habraaca.

**Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah (Individual Education Program, IEP):** Waxaa loo qoraa inuu daboolo baahiyaha ilmo lagu aqoonsaday naafo. Waa heshiis sharciyan dhaqan gal ah oo damaanad qaadaaya adeegyada lagu cadeeyay qorshaha in la siiyo ilmaha.

Tusmada Abuurista IEP-da waxay bixisaa tilmaamo iyo tusaaleyaasha abuurista IEP-yada.

**Heerarka Tacliinta ee Kentucky (Kentucky Academic Standards, KAS):** Waxaa ku jira heerarka ugu hooseeya ee qasabka ah ee dhammaan ardayda Kentucky ay tahay inay helaan fursadda waxbarashada kahor inta aysan ka qalin jebin dugsiyada sare ee Kentucky. Heerarka ayaa ka hadlaya waxa la baranaayo, laakiin kama hadlaan sida khibradaha waxbarashada loo naqshadeynaayo ama khayraadka ay tahay in la adegesado. Heerarka ayaa naga caawiya xaqiijinta in dhammaan ardayda ku dhaqan guud ahaan Kentucky la siiyo waxbarasho siman ayna helaan fursadaha waxbarashada heerarka sare.

**Foomka Diiwaanka Tilmaamaha Ka Qaybgalka qiimaynta Badalka ah ee Kentucky:** Foomku wuxuu aqoonsanayaa shuruudaha ay tahay in arday uu buuxiyo si uu ugu qalmo ka qaybgalka qiimaynta gaarka ah. Shuruudahaan waa in ay isku waafaqaan ARC dibna loogu eegaa kulanka sanadlaha ah.

**Hormarka Waxbarashada:** Qeexitaanka sida ardayda qaabka caadiga ah u kobcaaya ay u hormarin karaan ayna ku dhisi karaan kartiyadda waxbarashada muddo kadib. Hormarada waxbarashada ayaa noqon kara farsamooyin muhiim u ah macalimiinta si ay u adeegsadaan marka ay go'aaminayaan meesha ardaygu uu hormar ka samaynaayo barashada xirfad gaar ah ama fahanka fikirka.

**Learner Characteristics Inventory (Learner Characteristics Inventory, LCI):** Foomka su'aalaha iyo jawaabaha oo ka caawinaaya macalinka fahanka shaqsiyadda arday kasta ee dhinacyada kala duwan: ku hadalka luuqada, fahanka luuqada, maqalka, aragga, dhaqdhaqaaqa, la falgelidda, xaadirista, xirfadaha akhriska iyo xirfadaha xisaabta. LCI waxay leedahay labo ujeedo oo waawayn: 1) in la qeexo heerka sifooyinka ardayda ka qaybgalaaya imtaxaanaadka gaarka ah iyo 2) in la qeexo heerka qaybaha kamid ah sifooyinkaas ay ku soo baxayaan gudaha iyo dhammaan gobalka.

**Xogta La Uruuriyay Mudo Dheer:** Xogta la uruuriyay lana qiimeeyay muddo dheer kana badan muddo hal sano ah. Kaydka xogtu waa mid muddo dheer haddii ay uruurinayso isla nooca xogta ka hadlaysa isla mawduucyada wakhtiyada kala duwan. Tusaalayaasha xogta mudada dheer waxaa kamid ah Taariikhda Kobaca Bulsho, warbixinnada imtaxaanaadka isku dhafan, imtaxaanaadka baarista ah, natiijooyinka imtaxaanaadka gobalka iyo degmada oo dhan, cabirada qiimeynta habdhaqanka la qabsiga, xogta la socoshada hormarka, xogta qiimaynta habdhaqanka shaqada, qiimaynta kala guurka iyo qiimeynta tignooloojiyada.

**Nooca Xiriirka:** Qaabka guud ee arday u muujiyo fikradihiisa, sida erayada, sawirada, walxaha, tusmooyinka taatikada iyo hadalka xaqiijinta ah/tignooloojiyada kaalmaatiga ah.

**Wax Ka Badelka:** Isbadel lagu sameeyo agabka ama habraacyada inta lagu jiro casharka iyo qiimaynta kaas oo badelaaya filashooyinka waxbarashada ee casharka heerka fasalka. Isbadellada inta lagu jiro casharka ayaa ku haboonaan kara xaalad ku meelgaar ah si loo baxnaaniyo fahanka iyo xirfadaha ardayga. Isbadalada qiimaynta ayaa keeni kara cabirada khaldan ee aqoonta iyo xirfadaha ardayga sidaas awgeedna waa in la iska ilaaliyaa.

**Xeerka in Ilmo Kasta Wax la Baro (No Child Left Behind):** Sharci dawlada dhexe oo la ansixiyay 2002 oo loogu talo galay in laguna xisaabtamo dugsiyada hoose iyo sare waxbarashada heerarka sare leh. NCLB ayaa qasab ka dhigaaya in 100% ardayda (ayna ku jiraan ardayda waxbarashada gaarka ah iyo kuwa kasoo jeeda qoysaska la faquuqi jiray) ee dhigta dugsi ay gaaraan heerarka isku midka ah ee gobalka ee maadooyinka xisaabta iyo akhriska ugu danbayn sanadka 2014. NCLB waxaa badelay sharciga Every Student Succeeds Act (ESSA) sanadkii 2015.

**Shuruudaha ka Qaybgalka:** Qeexitaanadaan waxay xog dheeraad ah ka bixinayaan sifooyinka ardayda ee loogu baahan yahay buuxinta afarta shardi ee ka qaybgalka qiimaynta gaarka ah.

**Caam ah:** Ku jira dhammaan aagaga xogta tacliinta iyo dhammaan goobaha kala duwan (ayna ku jiraan dugsiga, guriga iyo deegaanka).

**Wax baritaanka Si Gaar ah Loo Naqshadeeyay (Specially Designed Instruction, SDI):** Dhaqan gelinta xogta, qaabka ama bixinta casharka si loo maareeyo baahiyaha gaarka ah ee ilmaha iyo si loo xaqiijiyo helitaanka manhajka si ilmuhu u buuxin karo heerarka waxbarashada ee degsan.

**Agabka Jawaabta ee la Doortay:** Agabka qiimeynta oo loo nidaamshay ardayda si ay jawaab u baxshaan ayagoo dooranaaya jawaab (tusaale, dookhyo badan, run ama been).

**Taageerooyinka Balaaran:** Waxaa ku jira taageero ka timaada macalimiinta iyo dadka kale (tusaale, macalinka khayraadka, kaaliyaha macalinka, caawiyaha) iyo taageerooyinka kala duwan ee agabka yaala goobta ardayga. Tusaaleyaasha waxaa ku jira dabaqaada qoraalka imtaxaanaadka iyo waxbarashada iyo baxnaaninta balaaran ee xogta si loo taageero waxbarashada.

**Agabka Sida Wayn loo Dhaqan Gashay :** Agabka sida wayn loo dhaqan gashay waxaa kamid ah agabka kala duwan ee fasalka iyo kuwa kale ee wax laga badelay muuqaalkooda iyo xogta laga so xigtay agabka ay ilmaha facood ah ee aan qabin naafada ay u adeegsadaan casharka ama qiimaynta. Tusaaleyaasha waxaa kamid ah soo gaabinta xajmiga qoraallada ama adeegsiga dhibcaha kor loo qaaday iyo gacan ku tirinta gacanta lala qabanaayo marka la aqoonsanaayo lambarada isleh ee xisaabta.

**Diiwaanka Xaqiijinta Kala Guurka (Transition Attainment Record, TAR):** Liiska hubinta oo qiimeeya diyaarsanaanta ardayga ee maadooyinka akhriska, xisaabta iyo sayniska.

## Su'aalaha Badanaa la Iswaydiiyo

1. **Waa maxay Qiimaynta Kooban ee Badalka ah ee Kentucky (AKSA)?**

   AKSA (oo horey loo oran jiray K-PREP-ka Gaarka ah) wuxuu u adeegaa ardayda qaba naafooyinka ugu badan ee garaadka. Naafonimadan ayaa u baahan kara qaababka gaarka ah ee ka qaybgalka qiimaynta gobalka oo dhan ee Kentucky si loo muujiyo guusha. Qiimaynta Badalka ah waxaa loo sameeyay xal u helidda baahiyaha ardayda ayadoo la ogolaanaayo dhaqan gelinnada qotoda dheer, isbadellada iyo qaababka gaarka ah ee ka qaybgalka qiimaynta gobalka.

   Macluumaad Dheeraad ah:

   Websaytka Qiimaynta Kooban ee Badalka ah ee Kentucky

2. **Yaa la qiimaynayaa?**

   Arday kasta oo dhigta fasallada 3-aad ilaa 12-aad ayaa lagu qiimayn doonaa heerarka gaarka ah ee heerarka kala duwan ee fasalka. Waxaa jira arday qaba naafo oo ka qaybgalaaya qiimaynta Kooban ee Kentucky (KSA) ee caadiga ah ayagoo aan u baahan caawimaado halka qaar kale u baahan yihiin caawimaado. Ardayda lagu aqoonsaday inay qabaan naafada wayn ee garaadka ee buuxiya Timaamaha Ka qaybgalka Qiimaynta Badalka ah ee Kentucky ayaa ka qaygeli doona qiimaynta gaarka ah ee loo yaqaano AKSA.

   Macluumaad Dheeraad ah:

   Xog ku saabsan maadooyinka lagu qaadaayo qiimaynta ee fasal kasta ee ardayda ka qaybgalaaya qiimaynta gaarka ah ayaa la soo dhigaa websaytka qiimaynta Kooban ee Gaarka ah ee Kentucky.

3. **Fasaladee ayaa lagu imtaxaanayaa AKSA?**

   Qiimaynta gaarka ah ayaa leh labo qaybood oo waawayn:

   - Shaqooyinka Xaqiijinta Xirfada kaas oo lagu cabiro waxqabadka ardayga ee dhameystirka shaqooyinka/hawlo gaar ah. Ardayda ayaa lagu qiimayn doonaa:
     - Akhriska - Fasalada 3-8 iyo 10
     - Xisaabta - Fasallada 3-8 iyo 10
     - Sayniska - Fasalada 4, 7 iyo 11
     - Cilmiga Bulshada - Fasalada 5 iyo 8
     - Qoraalka - Fasalada 5, 8 iyo 11
   - Diiwaanka Xaqiijinta ee Kala Guurka waxaa buuxiya ARC si loo cabiro waxqabadka ardayga ee xirfadaha tacliinta ee la xiriira kala guurka. Ardayda ayaa lagu qiimayn doonaa akhriska (Ingiriiska iyo akhriska oo isku dhafan), xisaabaadka iyo u diyaar garoowga sayniska ee fasalka 11.

4. **Yaa go'aaminaaya in ilmahaygu uu ka qaybgeli doono imtaxaan gaar ah?**

   ARC ayaa gaari doona go'aanno ku aadan barnaamijka waxbarashada iyo qiimeynta ardayda qaba naafada. ARC ayaa sidoo kale go'aamin doona sida ardayda naafada ah uga qaybgeli doonaan imtaxaanaadka gobalka iyo degmada. ARC ayaa go'aaminaaya haddii arday uu ka qaybgeli doona qiimaynta gobalka oo dhan asagoo helaaya caawimaado, aan helayn caawimaado ama haddii uu u baahan yahay in lagu qiimeeyo imtaxaan gaar ah.

5. **Sidee ayay go'aanka ku gaaraan ARC?**

   Ayaga oo adeegsanaaya [Foomka Dukumiintiga Tilmaamaha Ka Qaybgalka qiimaynta Gaarka ah ee Kentucky](), ARC ayaa qiimeyn doona xogta ardayga, oo ay kiraan xogta hormarka ee joogtada ah ee gaarka u ah heerka waxqabadka ardayga ee hadda. Tilmaamaha waxaa ku jira shuruudaha ka qaybgalka oo qeexaaya qaybaha gaarka ah ee tacliinta iyo sifooyinka. ARC waa inay ka doodaan ayna ku heshiiyaan jawaabta "haa" ayna bixiyaan dhukumiintiga qasabka ah ee shardi kasta oo laga soo qaatay tilmaamaha si loo go'aansho haddii arday uu u qalmo ka qaybgalka qiimeynta gaarka ah. ARC waa inay hayaan xogta gaarka ah si ay u baxshaan cadeynta iyo taageerada jawaabta "haa" ee bayaan kasta, ayna ku jiraan, laakiin kuma koobna warbixinta isku dhafan ee waxbarashada dhimirka, cabirada qiimeynta habdhaqanka la qabsiga, imtaxaanaadka manhajka, imtaxaanaadka qiimeynta ah, la socoshada hormarka iyo shaqada ardayga.

6. **Goorma ayuu ARC gaaraa go'aanka?**

   ARC waxay kulmaan ugu yaraan sanad kasta si ay u qiimeeyaan barnaamijka waxbarashada ardayga ayagoo dib u eega oo wax kabadella Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah (IEP) ee ardayga oo go'aamiya sida ardaygu uga qaybegli doono qiimaynta

gobalka oo dhan ee Kentucky. Ayagoo adeegsanaaya Foomka Dukumiintiga Tilmaamaha Ka Qaybgalka ee Kentucky, ARC waa inay dib u eegaan ayna dib u go'aamiyaan ka qaybgalka qiimaynta gaarka ah sanad kasta.

7. **Marka ARC ay go'aamiyaan in arday u qalmo ka qaybgalka qiimaynta gaarka ah, go'aanku ma kama danbays baa?**

   Ayadoo lagu saleynaayo xogta markaas ay hayaan ARC, arday ayaa horey loogu go'aamin karaa in uu ka qaybgalo qiimaynta gaarka ah. Haddii xog cusub soo baxdo ama isbadello dhacaan, gudiga ARC ayaa dib u shiri kara kadibna go'aamin kara in arday uusan hadda kadib u qalmin ka qaybgalka qiimeynta gaarka ah. Kulanka sanadlaha ah oo ay qabtaan gudiga ARC ayaa ka caawinaaya ARC gaarista go'aanka sanad kasta mar.

8. **Muxuu ilmahaygu uga shaqeynayaa mawduuc lamid ah isla kan ay ka shaqeynayaan ilmaha aan naafada qabin? Haddii ilmahaygu samayn karo taas, waxbarashada gaarka ah ma muhiim baa?**

   "Sharciga ESSA [Every Student Succeeds Act] ayaa qasab ka dhigaaya in isla agabka tacliinta iyo heerarka guusha loo dejiyo dhammaan ardayda (marka laga reebo heerarka guusha tacliinta ee gaarka ah ee ardayda qaba naafooyinka ugu waawayn ee tacliinta)." ESSA ayaa u baahan qiimeyno gaar ah oo lagu saleynaayo heerarka xogta ee heerka fasalka. (ESSA: Qodobada Muhiimka ah iyo Natiijooyinka Ardayda Naafada ah)

9. **Maxaa qasab ka dhigaaya in ilmahayga lagu imtaxaanno isla heerka fasalka ee lamidka ah ardayda aan qabin naafo la aqoonsaday?**

   Waxaa jira labo sharciyada federaalka ah oo go'aaminaaya sida dugsiyada loogula xisaabtami doono waxbarashada dhammaan ardayda ku nool Mareykanka, ESSA iyo Sharciga Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah (IDEA 2004). ESSA iyo IDEA babadaba ayaa doonaaya filashooyin sare ee barashada tacliinta iyo helitaanka manhajka guud ee ilmo kasta. Tan ayaa dejinaysa himilada ah in dhammaan ardaydu ay muhiim yihiin ayna wax ku baran karaan heerarka sareeya. Natiijooyinkii ugu danbeeyay ee cilmi baarista ayaa muujinaaya in ardayda qaba naafooyinka garaadka ee sareeya ay wax baran karaan. Macluumaadka qiimaynta gobalka ayaa loo adeegsadaa si ay gacan uga gaysato kor u qaadista dugsiyada iyo barnaamijyada oo ay la socdaan bixinta khibrada waxbarashada ugu wanaagsan ee dhammaan ardayda.

   Macluumaad Dheeraad ah:

   Casharka heerarka xogta heerka fasalka ayaa siinaaya ardayga fursad uu ku barto fikradaha loo adeegsan karo xaaladaha balaaran oo ay la socdaan barashada xirfadaha shaqada (nolosha) dabiiciga ah ee oo dheeraad ah. Isku darka labadaan fursadood ayaa abuuraysa khibrada dugsiga ee macnaha badan. Tusaale, inta ardaygu ka shaqeynaayo heer waydiinaaya ardayda inay qiimeeyaan xogta, abuuraan jaantus ayna sameeyaan xulashada haboon ayagoo adeegsanaaya xogta ama jaantuska, ardayga ayaa awooda:

- Inuu kordhiyo xirfadaha hadalka iyo bulshada (ayna ku jiraan iswiijyada iyo boorarka hadalka) asagoo haddana uruurinaaya sahan lagu uruurinaayo xogta;
- Inuu kordhiyo tirada dareenka inta uu galaayo xogta ku qoran jaantuska (tusaale, xiriirka fool ka foolka ah);
- Inuu kordhiyo xirfadaha haboon ee faahfaahsan ee gaarista go'aanka marka uu adeegsanaayo xogta si uu u xusho dookh asagoo adeegsanaaya xogta ama jaantuska (tusaale, midkee badan); iyo/ama,
- Inuu kordhiyo xirfadaha loo adeegsan karo shaqo (tusaale, gelinta xogta kumbuyuutarka, adeegsiga iswiij si uu u galo xogta, tirinta dadka jooga moolka).

Ardayda ka qaybgalaaya qiimeynta gaarka ah ayaa loo ogol yahay inay adeegsadaan taageerooyinka ka caawinaaya waxbarashada iyo inay noqdaan kuwo madax banaan. Taageerooyinkaan waxaa ku jiri kara yareynta heerka adkaanta, siinta sawiro ama walxo iyo adeegsiga tignooloojiyada kaalmaatiga ah.

**10. Miyaysan IEP-ga ilmahaygu go'aaminayn waxa uu ku barto dugsiga?**

Ujeedada IEP waa in la xaqiijiyo in ilmahaaga qaba naafooyinka uu helo waxbarashada bilaashka ah ee haboon ee dadwaynaha (FAPE). IEP waa qorshe qoran oo qeexaaya casharka sida gaarka ah loo sameeyay (SDI), caawimaadaha/isbadellada iyoa deegyada la xiriira ee loo baahan yahay si loo xaliyo baahiyaha shaqsiga ah ee ilmahaaga. SDI ayaa lagu qeexay IDEA ayadoo ah dhaqan gelinta xogta, qaabka ama bixinta casharka si loo maareeyo baahiyaha gaarka ah ee ilmaha iyo si loo xaqiijiyo helitaanka manhajka guud si ilmahaagu u buuxiyo heerarka waxbarashada ee hoos yimaada wakaalada dadwaynaha ee quseeya dhammaan carruurta. (34 CFR Qaybta 300.39) Heerarka waxbarashada gaarka ah ee Kentucky waa KAS. Maadaama cashar gaar ah oo maalin kasta lagu baxsho heerarka maadooyinkaas lagu bixiyo fasalka, qaybaha IEP-da ee sida cad loo qeexay (tusaale, heerka hadda ee waxqabadka, yoolalka sanadlaha ah iyo higsiyada/yoolalka, caawimaadaha/isbadellada) ayaa muhiim u ah xaqiijinta in waxbarashada haboon la bixiyo.

Xog Dheeraad ah:

IEP ayaan loogu talo gelin in uu noqdo barnaamijka guud ee waxbarashada ardayga. Badelka taas, waa barnaamij taageero oo ardaydu u baahan yihiin si ay u helaan ayna u xaqiijiyaan hormarka manhajka waxbarashada guud. IEP-ga waxaa abuura ARC ayadoo ah diiwaanka go'aannada ay gaaraan xubnaha gudiga. IEP waa qorshaha talaabada iyo dedaal la gelinaayo khayraadka lagu aqoonsaday gudaha barnaamijka. IEP-gu waa inuu go'aamiyaa waxbarashada gaarka ah ee muhiimka ah iyo adeegyada la xiriira iyo sidoo kale taageerooyinka ardaygu u baahan yahay marka uu baranaayo xogta waxbarashada manhajka guud.

**11. Qiimaynta gaarka ah ma xadideyaa caawimaada ilmahaygu helaayo?**

Macalinku waa inuu siiyaa ardayga caawimaada loo baahan yahay si uu u barto xirfadaha loo baahan yahay ee manhajka. Hase yeeshee, casharkaas waa in loo qaabeeyaa muddo kadib in uu ardayga ka caawiyo gaarista heerka sareeya ee madax banaanida si inta lagu jiro qiimaynta, ardaygu uu uga shaqeyn karo si madax banaan heerka ugu sareeya ee suuragalka ah.

Macluumaad Dheeraad ah:

Caawimaada qiimaynta waa in lagu saleeyaa baahiyaha gaarka ah ee ardayga. Caawimaada la siiyo ardayga waa in aysan sinaba ugu hagin jawaabta saxda ah.

**12. Ilmahayga ma loo ogolaanayaa inuu adeegsado isbadellada lagu sameynaayo qiimaynta gaarka ah?**

Qiimaynta badalka ah ayaa u sahlaaya ardayda inay adeegsadaan taageerooyinka gaarka ah (isbadellada, dhaqan gelinnada iyo tignooloojiyada kaalmaatiga ah) inta lagu jiro casharka iyo qiimaynta. Bixinta taageerooyinkaan ayaa u sahlaysa ardayga inuu barto casharka ku haboon da'da, xiisaha leh oo cadaadinaysa. Isbadalada ayaan ahayn kuwo la ogol yahay haddii taageeradu toos ugu hagayso ardayda jawaabta saxda ah. Tusaalaha taageerada la ogol yahay ayaa noqonaaya inuu raaco koodhka midabka, si ardaygu uu u yaqaano inuu ku bilaabo cagaar uuna ku dhameeyo casaan, tusaalaha taageero aan la ogolayn ayaa noqon doonta koodhka midabka ee jawaabta saxda ah ee midabka cagaar iyo jawaabta khaldan ee midabka casaan. Xog dheeraad ah ayaa lagu bixiyay Barnaamijyada Ka qaybgelinta Ardayda Baahiyaha Gaarka ah qaba ee qiimaynta Gobalku Qasab ka dhigaayo iyo Isla Xisaabtanka 703 KAR 5:070.

Macluumaad Dheeraad ah:

Qiimaynta guud ee gobalka ayaa sidoo kale u sahlaaya ardayda adeegsiga taageerooyinka inta lagu jiro casharka iyo qiimaynta. Si loo xaqiijiyo saxnaanta caawimaadaha imtaxaanaad kasta ee gobalku qasab ka dhigaayo, waa in loo adeegsadaa si joogto ah ayagoo qayb ka ah casharka guud iyo qiimaynta fasalka iyo sidoo buuxinta dhammaan shuruudaha dheeraadka ah ee lagu cadeeyay Barnaamijyada Ka qaybgelinta Ardayda Baahiyaha Gaarka ah qaba ee Qiimaynta Gobalku Qasab ka dhigaayo iyo Isla Xisaabtanka 703 KAR 5:070.

**13. Sida caawimaadaha ardaygayga ee qiimaynta gaarka ah ee la go'aamiyay?**

ARC waa inay go'aamiyaan caawimaadaha loo baahan yahay ayaga oo ku saleynaaya baahiyaha gaarka ah ee ardaygaaga. Ujeedada caawimaadaha ku aadan imtaxaanaadka waa in loo sahlo in buundada ardaygaagu waafaqsanaato waxa uu ka bartay manhajka guud. Caawimaaduhu waa inay la xiriiraan naafada ilmahaaga, oo wataan xogta qiimeynta oo cadeyn u ah. Waa in lagu qoraa IEP-ga waana in loo adeegsadaa ayagoo qayb ka ah jadwalka caadiga ah ee casharada tooska ah. Caawimaadaha ayaan loo adeegsan karin keliya

ujeedooyinka imtaxanaka. IEP-da waa in la qoraa si looga caawiyo ilmahaaga inuu helo xirfadaha uu u baahan yahay si uu guul uga gaaro manhajka guud, sidaas awgeedna caawimaadaha ayaa go'aan laga gaaraa sanad kasta mar. Marka xirfadaha ilmahaagu hormaraan, ku tiirsanaantiisa caawimaado gaar ah ayaa la yareyn karaa.

Tusaale, ilmo naafadiisu u baahan tahay inuu u baahdo maadooyinka heerka fasalka in kor loogu akhriyo, ayaa muddo kadib yeelan kara xirfadaha akhriska oo u sahlaaya in laga yareyeo isticmaalka aalada akhriska shaqooyinka qaarkood kadibna laga joojiyo. Caawimaadaha ayaan loogu talo gelin inay badel u noqdaan casharka ama adeegsiga tignooloojiyada kaalmaatiga. Marka la qoraayo IEP-da, ARC ayaa ka doodi kara qaababka loo yareeyo adeegsiga caawimaadaha muddo kadib. IEP-da waxaa lagu dari doonaa bayaan sharxaaya caawimaado kasta oo ilmahaagu u adeegsan karo qiimaynta gobalka iyo degmada oo dhan.

Macluumaad Dheeraad ah:

Xog dheeraad ah oo ku aadan xaaladaga guud ee adeegsiga caawimaadaha imtaxaanaadka gobalka ayaa laga heli karaa webseedka Imtaxanaka Kooban ee Gaarka ah ee Kentucky.

**14. Ilmahaygu ma heli karaa shahaadada caadiga ah ee dugsiga sare haddii uu ka qaybgalo qiimaynta gaarka ah?**

ARC waa inay go'aamiyaan haddii awooda garaadka iyo habdhaqanka la qabsiga ee ardaygu muujiyay ay ka hor istaageen dhamaystirka koorsada waxbarashada guud (ayna ku jiraan shuruudaha ugu yar ee qalin jebinta) xataa markii loo sameeyay isbadellada barnaamijka iyo/ama caawimaado. ARC oo adeegsanaysa xogta kala duwan iyo macluumaadka sida Tilmaamaha Ka qaybgalka ee Kentucky ee Foomka Dukumiintiga qiimaynta Gaarka ah, warbixinta isku dhafan ee garaadka waxbarashada, Kaydka Sifooyinka Ardayga (LCI), shaqada ardayga, kormeerada ardayga iyo xog kasta oo kale oo la xiriirta ayaa gaarayaa go'aankaan. Haddii ay tani dhacdo, ARC waa in ay go'aamiyaan in ardaygu uusan awoodi doonin inuu sameeyo koorsada waxbarashada guud si uu u helo shahaadada caadiga ah ee dugsiga sare wuxuuna sidaas awgeed buuxinayaa koorsada gaarka ah si uu u helo Shahaadada Gaarka ah ee Dugsiga Sare sida lagu sheegay xeerka Kentucky 704 KAR 3:305, Qaybta 10.

Macluumaad Dheeraad ah:

Ka qaybgalka qiimaynta gaarka ah ayaan ardayga qaba naafada ugu badan ee garaadka ka saarayn ardayga qaba naafada ugu badan ee garaadka inuu iskudayo buuxinta shuruudaha shahaadada caadiga ah ee dugsiga sare sida lagu sheegay Ka qaybgalka IDEA ee Imtaxaanaadka (34 CFR §300.160 (d)(2)).

Macluumaadka ku saabsan shuruudaha qalin jebinta ayaad ka heli kartaa wesbeedka Shuruudaha Ugu Yar ee Ka Qalin jebinta dugsiga Sare.

15. **Goorma ayuu ilmahaygu ka shaqeyn doonaa xirfadaha shaqada (nolosha) ee ku qoran IEP-da?**

    Dhammaan macalimiintu waa inay eegaan adeegsiga shaqo ee dhammaan waxbarashada. Tan ayaa si gaar ah u qusaysa ardayda qaba naafooyinka daran ee garaadka. Xirfadaha shaqada ayaa lagu dhafi karaa casharka tacliinta. Marka xirfadda IEP-da aan lagu bari karin casharka waxbarashada, wakhti waa in loo dejiyaa si looga caawiyo barista xirfadda sida muhiimka ah. Marka arday uu sameeyo qiimaynta gaarka ah ee gobalka ee laga doonaayo fasalka 12aad, ardayga ayaa intaas kadib diirada saari kara keliya xirfadaha u guurista nolosha ilaa uu ka gaaro 21.

    Xog Dheeraad ah:

    Ayagoo raacaaya heerarka heerka fasalka oo loo sameeyay dhammaan ardayda si looga caawiyo xaqiijinta in taxanaha xirfadaha la baro marka uu ka gudbaayo dugsiga hoose una gudbaayo kan dhexe iyo dugsiga sare, macalimiinta ayaa gaar ka dhigi kara casharka iyo filashooyinka si loo daboolo baahiyaha ardayga ayagoo haddana la raacaayo manhajka. Marka macalimiintu ay gaar ka dhigaan casharka iyo filashooyinka, waxay muhiimada saari karaan xirfadaha shaqada iyo IEP-da. Tusaale, marka ardayga dugsiga hoose uu baranaayo cabirka dareereyaasha, ardayga ayaa baran kara sida loo cabiro dareereyaasha cuntada lagu karsado ama dhar dhaqaalka. Marka fasalka dugsiga dhexe lagu baranaayo sheeko mala awaal ah ama run ah, ardayga ayaa baran kara aqoonsiga agabka runta ah (sida, buugaagta cunto karinta, wargaysyada, iwm.) iyo jiliinka (bugaagta duuban). Marka ardayda dugsiga sare ay baranayaan falcelinta kiimikada, ardayga ayaa diirada saari kara kiimikooyinka guriga si uu iskaga ilaaliyo isku qaskooda.

16. **Maxaa dhacaaya haddii la go'aansho in ilmahaygu u baahan yahay inuu fasalka joogo wax ka badan hal sano?**

    Ardaygu waa in lagu qoraa fasalkaas markale diiwaannada dugsiga uuna ka qaybgalaa qiimaynta heerka fasalka ee gaarka ah markale. [703 KAR 5:240, Qaybta 8 (3)]

    Xog Dheeraad ah:

    Xog dheeraad ah oo ku aadan haynta ardayda qaba naafooyinka ayaa laga heli karaa warqadda Agoosto 19, 2003 ee kasoo baxday Xafiiska Waxbarashada Gaarka ah iyo Adeegyada Baxnaaninta (OSERS).

17. **Xagee ayaan ka helayaa xog dheeraad ah oo ku aadan Timaamaha Ka Qaybgalka Qiimaynta Badalka ah ee Kentucky?**

    Tusmo dheeraad ah oo ku saabsan Foomka Dukumiintiga Timaamaha Ka Qaybgalka Qiimaynta Badalka ah ee Kentucky ayaad ka heli kartaa dukumiintiga Tusmada Gudiga Diiwaan Gelinta iyo Shaacinta (ARCs) ee ka Go'aannada Ka Qaybgalka Qiimaynta Badalka ah ee Kentucky oo ku jirta bogga Tusmada ka Qaybgalka.